
Hagaha Qoyska ee Bartaha Ingiriiska Gahanna-Jefferson Public Schools





Foomka Macluumaadka Dugsiga ee Muhiimka ah

I. Guud marka Barnaamijka EL

Sida Ardayga loogu Aqoonsado Barte Ingiriis
Adeegyada ay Barteyaasha Ingiriisigu Heli Karaan
Shuruudaha Imitixaamka Sanadlaha ah
Ka bixida Adeegyada Bartayaasha Ingiriiska
Waxbarashada Gaarka ah ee EL iyo Kartida iyo Hibada

II. Guudmarka Gahanna-Jefferson Public Schools

Dugsiyadeena
Khariirada Degmada
Jadwalka Caadiga ah ee Ardayga
Imaanshaha
Xogta Gurmadka
Quraacda iyo Qadada
Basaska Dugsiga
Tiknolajiyada
Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus
Hawlaha Dugsiga kadib

III. Agabyada loogu talagaley Qoysaska

Waxyaabaha Qoysasku Samayn Karaan Si ay Waxbarashada U Taageeraan
Macluumaadka Kale ee loogu Talagaley Qoysaska Bartayaasha Ingiriiska

IV. Macluumaadka Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Dejinta Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus
Cusboonaysiinta Macluumaadka Ardayga ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus
Ku bixinta kharashka Dugsiga Xiriirka Waalidka Infinite Campus
Lacag ku Shubida Kootada Qadada ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus
Codsashada Qadada Bilaashka ah ama Qadada Qiima dhiman ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus



Gahanna-Jefferson
PUBLIC SCHOOLS

Hadii ardaygaagu aanu dugsiga imaanaynin, xafiiska wac subaxdii.

Wakhtiyada Dugsi:

Dugsi Hoose

8:00 Subaxnimo -
2:25 Galabnimo

Dugsi Dhexe

8:40 Subaxnimo -
3:30 Galabnimo

Dugsi Sare

7:35 Subaxnimo -
2:50 Galabnimo

{Dugsiga waxaa subaxdii 20 daqiqo kahor wakhtiga caadiga ah loo furaa ardayda quraacdha ka gadanaysa dugsiga}

Iimaylka

Macluumaadka dugsiga iimaylkaaga ayaa laguugu soo diri doonaa. Eeg iimaylkaaga maalin kasta.

Ardayga	Macalinka Fasalka iyo iimaylka

Quraacda iyo Qadada

Waxaad liiska qadada [ka heli kartaa](#) xafiiska dugsiga.

Waxaad Codsiga [gadada bilaashka ah iyo qadada qiima dhimista leh ka heli kartaa](#) xafiiska dugsiga.

Ardaydu quraacda xaafada ayay kasoo cuni karaan ama dugsiga ayay ka gadan karaan. Quraacdhu waa \$1.50

Ardaydu qadada ama xaafada ayay kasoo qaadan karaan ama dugsiga ayay ka gadan karaan. Qadadu waa \$2.75

Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Magaca isticmaalaha: _____ Eray-sireedka: _____

Waa inaad gashaa Infinite Campus:

- Cusboonaysii Macluumaadka Caafimaadka Gurmadka ah Bilowga Sanad Dugsiyeed Kasta
- Eeg Kaararka warbixinta
- Lacag ku shub xisaabta kootada Qadada ama codso cuntooyin bilaash ah iyo mid la qiima dhimay

Baska

Lanbarka Baska: _____ Boosteejada Baska: _____

Subaxdii Wakhtiga Qaaditaanka: _____ Galabtii Wakhtiga Keenista: _____

Qaybta 1



Barnaamijka Bartaha Ingiriiska Guudmarka

Barnaamijka Bartaha Ingiriiska ee (EL, English Learner) wuxuu taageeraa ardayda dhigata dugsiga Gahanna-Jefferson Public School District ee aqoontooda ingiriisku xadidantahay (LEP, Limited English Proficiency). Waxaa heli kara dhamaan ardayda degmada ee u qalanta ee fasalada K-12.

Barnaamijka EL wuxuu taageeraa xirfadaha Akhriska, qorista, dhagaysiga iyo ku hadalka Ingiriiska iyo ka caawinta casharada tacliimeed. Khabiirada Bartayaasha Ingiriiska waxaa lagu tababrey inay wax baraan ardayda ku hadasha luuqado kale una baahan in laga caawiyo Luuqada Ingiriiska.

Sida Ardayga loogu aqoonsado Bartaha Ingiriiska

Waxaad buuxisay Xog-ururinta Iisticmaalka Luuqadda inta lagu guda jiray diiwaangelinta onlaynka ah ee Xarunta Soo-dhaweynta ee degmada. Xog uruurinta gudaheeda, waxaad sheegtay in cunugaagu ku hadlo luuqad aan Ingiriis ahayn. Mid kamid ah khabiirada Bartayaasha Ingiriiska ayaa kaala hadley si aan wax uga ogaano waxbarashada hore ee ilmahaaga iyo luuqada(ha) ay ku hadlaan. Kadib Khabiirka Bartayaasha Ingiriisku wuxuu sameeyay qiimayn loo yaqaano Imtixaamka Aqoonta Luuqada Ingiriiska ee Ohio (OELPS, Ohio English Language Proficiency Screener). Waxay qiimaysay awooda cunugaaga ee akhriska, dhagaysiga, ku hadalka iyo qorista Ingiriiska marka loo barbardhigo caruurta kale ee la da'da ah ee ku nool Maraykanka. Natijada ilmahaagu waxay muujinaysaa inay yihiin Barte Ingiris oo ay caawimo dheeraad ah ka heli karaan Khabiirka Bartayaasha Ingiriiska ee Dugsiga.

Adeegyada ay Barteyaasha Ingiriisigu Heli Karaan

Dugsiyadeena waxay bixiyaan adeegyada soo socda si cunugaaga looga caawiyo inuu Ingiriiska barto oo uu horumar tacliimeed usameeyo:

- **Caawinta Fasalka Dhediisa:** Ardaydu waxay caawimo dheeraad ah ka helaan Khabiirka Bartaha Ingiriiska iyo macalinka fasalka ee fasalkooda.
- **Xiisadaha kooxaha kooban:** Ardaydu koox koox ayay wax uga bartaan Khabiirka Bartayaasha Ingiriiska si ay u hormariyaan Xirfadahooda Ingiriiska.
- **Barista:** Ardaydu waxay helayaan caawimo dheeraad ah oo ku saabsan layliga guriga, tacliinta iyo Ingiriisiga. Tani waxay noqon kartaa maalintii inta ay dugsiga joogaan. Dugsiyada qaarkood waxay sidoo kale leeyiihin xiisado dheeraad ah dugsiga kadib .
- **Fasalka Fanka ee Luuqada Ingiriiska lala barto:** Ardaydu waxay fasalka la gelayaan kaliya ardayda kale ee Ingiriisiga baranaysa. Fasalada gabaadka leh, macalimiintu waxay ardayga Ingiriisiga ku baraan hab ay wax ku baran karaan. (Keliya Dugsi Dhexe/Sare)
- **Imagine Learning:** Imagine Learning waa barnaamij kombuyuutar ah oo ardaydu dugsiga ama xaafada ku qaataan si ay ugu celceliyaan akhriska, qorista, hadalka iyo dhagaysiga.

Adeegyada Dheeraadka ah ee Bartaha Ingiriisku ku helayo dugsiga dhediisa waxay ka caawin doonaan inuu barto xirfadaha tacliinta. Macalinka cunugaagu wuxuu kula wadaagi doonaa adeegyada, yoolka iyo hormarka waxbarasho ee cunugaaga.

Ardayda u baahan Qorshaha Waxbarashada Shakhsiyeed (IEP, Individualized Education Plan) naafonimo darteed, Khabiirka Wax-ka-qabadka (IS, Intervention Specialist) iyo Khabiirka Barashada Ingiriiska ayaa u samayn doona qorshaha baahida Luuqada Ingiriiska.

Shuruudaha Imtixaamka Sanadlahaa ah

OELPA

Ardaydu waxay gu' kasta qaadan doonaan Qiimaynta Aqoonta Luuqada Ingiriiska (OELPA, Ohio English Language Proficiency Assessment). Natijada imtixaamkan ayaa xagaaga boostada lagugu soo diri doonaa. Ardaydu waxay heli doonaan natijada qayb kasta oo akhriska, dhagaysiga, ku hadalka iyo qorista ah. Waxay sidoo kale islamarkiiba heli doonaan qiimaynta guud ee Bilowga (hoose), Horumarayo (dhexdhexaadka), ama Aad u yaqaan (horumarsan).

Imtixaanada Maamul Goboleedka Ohio

Dhamaan ardayga fasalka 3aad ilaa iyo dugsiga sare waa inay sameeyaan imtixaanada Ohio ee akhriska/qorista, xisaabta iyo mararka qaar sayniska iyo cilmiga bulshada. Ardaydu waxay imtixaanadan dugsiga ku qaataan bisha Abriil. Imtixaanaadka Maamul goboleedka Ohio wuxuu ardayga ku imtixaamaa waxay yaqaanaan. Macluumaadkani wuxuu dugsiga iyo gobolka ka caawiyaan inay ogaadaan in ardaydu leeyihii xirfadaha ay ugu baahan yihiin heerka fasalkooda. Natijada waxaa boostadu lagugu soo diri doonaa dayrta.

CABIRKA HORUMARKA WAXBARASHADA (MAP)

Ardayda fasalada K ilaa iyo 10 waxay sameeyaan imtixaamka cabirkha horumarka waxbarashada (MAP, Measure of Academic Progress) labo ilaa sadex jeer sanadkii. Waxay qiimaysaa xirfada akhriska iyo xisaabta. In su'aaluhi fududaadaan ama adkaadaan waxay ku xirantahay sida ardaygu wax u yaqaano. Tani waxay macalimiinta ka caawisaa inay ogaadaan waxa ardaydu ka barteen akhrisa iyo xisaabta. Tani waxay sidoo kale macalimiinta tusinaysaa waxa ardaydu ay wali u baahan yihiin inay bartaan. Natijada guriga ayaa lagugu soo diri doonaa ama waxaa lagugu siin doonaa shirarka waalidiinta iyo macalimiinta.

Imtixaanada Kale

Heerarka fasalada qaarkood waxay leeyihii imtixaano kale kuwaas oo arday kasta uu ku qasbanyahay inuu sameeyo, si ay uga caawiyaan macalimiintu inay ogaadaan in ardaygu keenay dhibcihi koorsooyinka khaaska ah loogaga baahnaa iyo in ardaygu caawimo dheeraad ah ugu baahanyahay sabab kale oo aan ahayn xirfada luuqada Ingiriiska, ama uu yahay arday dhakhso wax barta laakiin u baahan dhiirigelin dheeraad ah. Macalinka cunugaaga ama dugsiga ayaa ku soo ogaysiin doona hadii cunugaaga imtixaam laga qaadi doona sababahan dartood.

Hadii aad wax su'aalo ah ka qabto imtixaanadan, fadlan waydii macalinka cunugaaga ama Khabiirka Bartayaasha Ingiriiska. Wuxaan sidoo kale macluumaadkan kugu siin karnaa luuqado kale oo aan ingiriis ahayn hadii loo baahdo.

Ka bixida Adeegyada Bartayaasha Ingiriiska

Ardaydu way u sii socon doonaan adeegyada barashada Ingiriiska ilaa ay ka helaan guud ahaan natijada baasida ee OELPA. Natijada baasidu waa 4 ama 5 in laga keeno dhamaan afarta qaybood ee imtixaamka. Ardayda hela natijada baasidda ee OELPA ma sii heli doonaan adeegyada Bartayaasha Ingiriisiga waxaana lala socon doonaa laba sano kadib markay adeegyadu dhammaadaan.

Waxbarashada Gaarka ah ee EL iyo Kartida iyo Hibada

Waxbarashada Gaarka ah

Hadiiuu cunugaagu ku dhibtoonayo dugsiga, dugsiga ayaa kula soo xariiri doona si aad uga qayb gasho kulan lagu go'aaminayo in cunugaagu u baahanyahay caawimo dheeraad ah oo laga qaado imtixaam lagu ogaanayo suurtogalmimada inuu waxbarasho gaar ah u baahanahay iyo in kale. Marka ardaygu helo Qorshaha Waxbarashada Shakhiyed (IEP, Individualized Education Plan) naafonimadiisa darteed, khabiirka EL iyo Macalinka Waxbarashada Gaarka ah ayaa si wada jir ah u go'aamin doona taageerada Luuqada ee ku haboon.

Hibada iyo Kartida

Bartayaasha Ingiriiska waxay imtixaanaad kala duwan la galaan ardayda fasalkooda ah si ay u ogaadaan inay yihiin arday hormarsan kuwaas uu buuxiyay shuruudaha qeexitaanka hibada ee Ohio. Hadii cunugaaga loo aqoonsado mid hibo leh, waa lagula soo xariiri doonaa. Adeegyada waxa laga yaabaa in laga bixiyo waaxda Hibada iyo Kartida.

Qaybta 2



Gahanna-Jefferson Public Schools Guudmarka

Dugsiyadeena

Dugsiga Hoose (Xanaanada caruurta ilaa iyo fasalka 5aad)

- Blacklick Elementary - 6540 Havens Corners Road Blacklick, OH 43004 Tel: 614-759-5100
- Chapelfield Elementary - 280 Chapelfield Road Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5575
- Goshen Lane Elementary - 370 Goshen Lane Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5580
- High Point Elementary - 700 Venetian Way Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5545
- Jefferson Elementary - 136 Carpenter Road Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5560
- Lincoln Elementary - 261 Helmbright Dr. Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5555
- Royal Manor Elementary - 299 Empire Drive Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5585

Dugsiyada Dhexe (Fasalada 6aad ilaa iyo 8aad)

- Middle School East - 730 Clotts Road Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5550
- Middle School South - 349 Shady Spring Drive Gahanna, OH 43230 Tel: 614-337-3730
- Middle School West - 350 Stygler Road Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5570


Dugsiga Sare (Fasalada 9aad ilaa iyo 12aad)

- Gahanna Lincoln High School - 140 South Hamilton Road Gahanna, OH 43230 Tel: 614-478-5500

Dhismayaasha Kale

- Xafiiska Dhexe - 160 S. Hamilton Rd., Gahanna, OH 43230 Tel: 614-471-7065
- Clark Hall - 380 Granville St. Gahanna, OH 43230
 - Xarunta Soo Dhawaynta - Tel: 614-643-8300
 - Barnaamijka Kahor Dugsiga Xanaanada - Tel: 614-479-1314
- Xafiiska Gaadiiidka - Tel: 614-751-785
- Caawinta Tiknoolajiyada - Tel: 614-751-7851

Khariirada Degmada



Jadwalka Caadiga ah ee Ardayga

Dugsi Hoose

Ardayda Xanaanada ilaa iyo fasalka 5aad waxay dugsiga dhigtaan qiyaastii 7 saacadood maalin kasta. Waxay wax ka baran doonaan hal ama macalimiin badan oo bara akhriska, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada. Sidoo kale waxay asbuuc kasta qaadan doonaan xiisadaha maktabada, muusiga, farshaxanka iyo jimicsiga jirka (xiisada jimicsiga). Sidoo kale maalinta qaarkeed ayay Khabiirada Bartayaasha Ingiriiska waxay bartayaasha Ingiriiska wax ku bari doonaan fasaladooda iyo/ama kooxo gaar ah. Ardaydu dugsiga ayay qadada ku cuni doonaan waxayna heli doonaan ugu yaraan hal nasasho.

Dugsi Dhexe

Ardayda fasalka 6aad ilaa iyo fasalka 8aad waxay dugsiga dhigtaan qiyaastii 7 saacadood maalin kasta. Waxay yeelan doonaan macalimiin kala duwan oo bara akhriska, xisaabta, sayniska, iyo cilmiga bulshada. Waxay sidoo kale awoodi doonaan inay qaataan xiisadaha muusikada, farshaxanka, iyo jimicsiga jirka (xiisada jimicsiga) iyo ikhtiyaaro kale oo dhowr ah. Ardaydu waxay maalin kasta heli doonaan hool ay wax ku akhristaan ama xiisad u meerin ah oo dheeraad ah. Sidoo kale maalinta qaarkeed ayay Khabiirada Bartayaasha Ingiriiska waxay bartayaasha Ingiriiska wax ku bari doonaan fasaladooda iyo/ama kooxo gaar ah. Ardaydu dugsiga ayay qadada ka cuni doonaan.

Dugsiga Sare

Ardayda fasalka 9aad ilaa iyo fasalka 12aad waxay iskuulka dhigtan doonaan qiyaastii 7 saacadood maalin kasta. Waxay yeelan doonaan macalimiin kala duwan oo bara akhriska, xisaabta, sayniska, iyo cilmiga bulshada. Waxay sidoo kale awoodi doonaan inay qaataan xiisadaha musikada, farshaxanka, iyo jimicsiga jirka (xiisada jimicsiga) iyo ikhtiyaaro kale oo badan. Ardaydu waxay maalin kasta heli doonaan hool ay wax ku akhristaan ama xiisad u meerin ah oo dheeraad ah. Sidoo kale maalinta qaarkeed ayay Khabiirada Bartayaasha Ingiriiska waxay bartayaasha Ingiriiska wax ku bari doonaan fasaladooda iyo/ama kooxo gaar ah. Ardaydu dugsiga ayay qadada ka cuni doonaan.

Imaanshaha

Ardayda waxaa laga doonayaa inay dugsiga tagaan maalin kasta wakhtiga jadwalka loo daejiyay oo dhan. Waa muhiim in ilmahaagu ku yimaado waqtigii loogu talagalay oo uu joogo ilaa laga gaarayo wakhtiga la baxayo. Haddii ilmahaagu buko ama aanu awoodin inuu maalin dugsiga aado, fadlan wac xafiiska dugsiga subaxdii.

Xogta deg dega ah

Waa muhiim in dugsigu hayo macluumaadka caafimaadka ee cunugaaga hadii lacala ay dhacdo cunugaagu xanuuusado ama dhaawac soo gaaro inta iskuulka la joogo. Markaad cunugaaga dugsiga ku diiwaan galinayso si onlayn ah, waxaad qortaa macluumaadka baahidiisa caafimaadka iyo cida la wacayo hadii ay xaalad deg deg ah timaado. Waxaad u baahantahay inaad macluumaadkan sanad kasta ku cusoobaysiiso Xiriirkha Waalidka ee Infinite Campus. Hadii cunugaagu u baahanyahay inuu daawo qaato maalintii inta dugsiga uu joogo, fadlan la hadal kalkaasida caafimaadka ee dugsiga oo buuxi foomka loo bahanyahay.

Quraacda iyo Qadada

Ardaydu intaan xiisaduhu bilaabin ayay gadan karaan quraacda iyo qadada hadii ay rabaan. Sidoo kale quraacda guriga ayaad kusoo siin kartaa ama qadada ayay soo qaadan karaan si ay iskuulka ugu cunaan.

Waxaa jira liiska cuntatada oo kuu sheegaya quraacda iyo qadada maqaayada iskuulku gaddo maalin kasta. Wuxaan liiska cuntata maqaayada ka helaysaa Mareegta degmada dugsiga ama waxaad nuqul ka heli kartaa xafiiska iskuulka. Ilmahaagu iyagaa quraacda ama qadada iska bixinaya iyagoo isticmaalaya kootada xisaabtooda ee Infinite Campus. Waxaad kootada xisaabtan lacagta ugu shubi kartaa bogga Xiriirka Waalidka ee infinite Campus. Ilmahaagu quraacda iyo qadada bilaash ayay ku heli karaan hadii aysan qoyskaagu lacag badan haysan. Waxaad qadada bilaashka ah ka codsan kartaa bogga Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus.

Basaska Iskuulka

Hadii aad degantahay meel dugsiga u jirta wax ka badan 1 mayl, baska ayaa cunugaaga dugsiga geynaya kana soo celinaya. Waxaa lagu siin doonaa lanbarka baska, xiliga la qaadayo iyo meesha laga qaadayo, xiliga la keenayo iyo meesha basku soo istaagayo. Hubi in cunugaagu subaxdii wakhtiga saxda ah soo istaago boostejada baska si uusan basku u dhaafin. Xoghayaha dugsiga ilmahaagu dhigto ayaa macluumaad dheeraad ah kaa siin karta basaska, ama waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan basaska ka heli kartaa mareegteena dugsiga.

Tiknolajiyada

Dhamaan ardayda waxaa la siin doonaa Kombuyutar (kombuyutarka gacanta) si ay dugsiga ugu isticmaalaan. Ardayda dhigata fasalada 6aad ilaa 8aad guriga ayay u qaadan karaan si ay layiska guriga uga soo shaqeeyaan. Waxaa lagu waydiin doonaa inaad buuxiso foom aad ku xaqijinayso in cunugaagu kombuyutarka si sax ah guriga ugu isticmaali doono. Waxaad sidoo kale gadan kartaa qorshe caymis hadii ay lacala dhacaan wax difeeto ugaysta kombuyutarka. Hadii kombuyutarka wax ku dhacaan, fadlan si dhakhso ah xafiiska dugsiga usoo wargeli.

Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus waa meesha aad ka arki karto kana cusboonaysiin karto macluumaad shakhsiyeed iyo kuwa caafimaad ee cunugaaga, macluumaadka baska, ka bixin karto khidmaha, oo aad ka arki karto jadwalka iyo natiijooyinka ilmahaaga. Xiliga diiwaan gelinta ayaad heli doontaa macluumaadka sida loo isticmaalo bogga Xiriirka Waalidka. Sanad kasta, waa inaad bogga Xiriirka Waalida oo aad cusboonaysiiso Macluumaadka shakhsiyeed ee cunugaaga. Mareegta Bogga Xiriirta Waalidku waa <https://portal.gips.org/>.

Hawla Dugsiga kadib

Dugsiyada qaar ayaa bixiya waxqabadyo wakhtiga dugsiga ka dib ah. Waxaa jiri kara meeris, naadiyada tacliinta ama barnaamijyada farshaxanka. Dugsiyada dhexe iyo Sare waxay leeyihii barnaamijyada muusiga iyo madadaalada iyo kooxaha ciyaaraha kuwaas oo kulma dugsiga kahor ama kadib. Waxaad liiska waxqabadyada dugsiga ee wakhtiga dugsiga kadib la sameeyo ka heli kartaa xafiiska dugsiga.

Qaybta 3



Agabyada loogu
talagaley qoyska

Waxyaabaha qoysasku samayn karaan si ay waxbarashada u taageeraan


Waxyaabo badan oo aad ilmahaaga dugsiga kaga caawinayso ayaad samayn kartaa.

- Ilmahaaga wax badan la sheekayso. ka hadal maalintaada oo ilmahaagu u ogolow inay kaaga sheekeeyaan maalintooda. Ka hadal dhacdooyinka taagan. Ka hadal waxyaabaha qoyskaagu samaynayo ama dareemayo. Hadalkani wuxuu ku bixi karaa luuqadaada hooyo ama af Ingiriis.
- Wax ugu akhri ilmahaaga luuqadaada hooyo, iyo Af ingiriis hadii ay suurtogal tahay.
- U ogolow in cunugaagu wax kuu akhriyo.
- Hubi in cunugaagu seexdo ugu yaraan 8 saacadood kahor wakhtiga loo kacayo iskuulka.
- Cunugaaga ha quraacdo kahor inta uusan dugsiga aadin ama dugsiga haku quraacdo.
- La kulan macalimiinta ilmahaaga oo ka qaybgal shirarka waalidiinta iyo macalimiinta. Ogaysii macalimiinta hadii aad rabto in tarjumaan laguu keeno goobta shirka. Kharash kuguma ahan in tarjumaan laguugu keeno goobta shirka. Kani waa adeeg bilaash ah.
- Ka qaybgal munaasabadaha qoyska ee iskuulka si aad ula kulanto waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga.
- Waydii su'aalo hadii aad ubaahantahay macluumaad dheeraad ah ama ay jiraan wax aadan fahmin. Khabiirka Bartayaasha Ingiriiska, Macalinka fasalka ma maamulaha dugsiga way ku faraxsanyihiin inay ku caawiyaan.

Macluumaadka Kale ee loogu Talagaley Qoysaska Bartayaasha Ingiriiska

Dikumintiyo la tarjumay

Waxaad tarjumaada mareegta dugsiga ka arki kartaa (www.gahannaschools.org) adiga oo dooranaya luuqada aad doonayso in shaashada kuugu soo baxdo.



Sidoo kale, waxaanu tarjuney noocyada foomamka inta badan la isticmaalo oo ay ku jiraan:

- Xog-uruurinta Adeegsiga Luuqada
- Ogaysiisyada Qiimaynta iyo Adeegyada
- Warbixinta Natijada OELPA
- Warbixinta Natijada OST

Hadii aad ubaahantahay warqad tarjuman, fadlan la xariir Khabiirka El ee cunugaaga.

Muuqaalada Macluumaadka Guud ee Dugsiga

[Parent 2 Partners](#) waxay sameeyeen muuqaallo ay ka sameeyeen mowduucyada kala duwan ee dugsiga sida is qorista, imaanshaha, OELPA iyo OELPS, shirarka macalimiinta, foomamka caafimaadka iyo wax kaloo badan.

Muuqaaladan waxaa lagu tarjumay luuqado badan, waxaan si bilaash ah looga daawan karaa mareegtooda ah <https://www.parents2partners.org/resources/>.

Mareegaha iyo hagayaasha la soo dejin karo

Mareegyadan soo socda waxaa ku jira xog laga yaabo inay ku anfacaan.

- [Colorín Colorado: Loogu talagaley Qoysaska](https://www.colorincolorado.org/families/Hagaha_Walidiinta_ee_Bartayaasha_Ingiriiska) (https://www.colorincolorado.org/families/Hagaha_Walidiinta_ee_Bartayaasha_Ingiriiska)
(Lagu heli karo luuqadaha Ingiriiska iyo Isbaanishka) (<https://educationnorthwest.org/resources/parent-guide-english-learners-english-and-spanish-versions>)
- [In dugsi dhigasho laga bilaabo Maraykanka: Hagaha loogu talagaley Ardayda iyo Waalidiinta Cusub](https://ies.ed.gov/ncee/edlabs/regions/northwest/news/newcomer-guides.asp) (Lagu heli karo Ingiriis, Isbaanish, Carabi, iyo Soomaali) (<https://ies.ed.gov/ncee/edlabs/regions/northwest/news/newcomer-guides.asp>)
- [Talooyinka Akhriska ee loogu talagaley waalidiinta](https://www.readingrockets.org/article/reading-tips-parents-multiple-languages#languages) (Lagu heli karo luqado badan) (<https://www.readingrockets.org/article/reading-tips-parents-multiple-languages#languages>)
- [LEP.gov](https://www.lep.gov/education) (waxaa ka mid ah agabyada sharciga iyo warqada xaqiiqada ee loogu talagaley qoysaska aan Ingiriiska aan aqoon; agabyada qaar ayaa lagu heli karaa luuqado badan) (<https://www.lep.gov/education>)

Qaybta 4



Xiriirka Waalidka ee
Infinite Campus

Dejinta Xiriirka Waalidka ee Mareegta ee Infinite Campus

Bogga laga galu Mareegta Xiriirka Waalidku waa

https://gahannajeffersonoh.infinitecampus.org/campus/portal/parents/gahanna_jefferson.jsp.

Foomk Codsiga Caawinta Xiriirka Waalidiintu waa

<https://docs.google.com/forms/d/e/1FAIpQLSdNkUpqyIBsE-ixujiqb-6DQgNXD14zstAX1o-zjhUMiX5Qjw/viewform>.

Isticmaalaya markii ugu horaysay-- Samaynta Kootada Xiriirka Waalidka

Waxaad u baahantahay furaha howlgelinta si aad u samaysato Kootada Xiriirka Waalidiinta. Tani dugsiga ayaa iimayl kuugu soo diraya. Hadii aadan haysan furaha howlgelinta, fadlan [soo gudbi codsiga caawinta](#).

[Log In](#)

[Forgot Password?](#) [Forgot Username?](#) [Help](#)

[Log in to Campus Student](#)

————— or ————

[New User?](#)

Si aad kootada u samaysato, guji “New User?” (Isticmaalah Cusub?) linkiga [login page \(bogga gelitaanka\)](#). Furaha howlgelinta geli sanduuqa. Guji Submit si aad ubilowda hab socodka samaynta kootada. Markaad samaysato kootadaada, fadlan geli ciwaanka iimaylka amniga. Ciwaanka iimaylka ayaa la isticmaali doonaa hadii aad ilowdo magaca aad isiticmaasho (username) ama erays sireedka (password).

Iloobay magacaad isticmaasho ama eray sireedka

Hadii aad ilowdo magaca aad isticmaasho ama eray sireedkaaga, dib ayaad u heli kartaa adoo isticmaalaya “Forgot Password?” (iloobay eray sireedka) iyo “Forgot Username?” (iloobay magaca isticmaalah) linkiyada [bogga gelitaanka](#). Guji linkiyada oo geli ciwaanka iimaylka amniga ah ee aad isticmaashey markaad samaysanaysay kootadaada xisaabta. Tilmaamaha aad dib ugu samaysan karto magaca aad isticmaasho ama eray sireedkaaga iimayl ayaa laguugu soo diri doonaa. Hadii aadan helin fariintan fadlan xasuusnow inaad ka eegto galka qashinka. Hadii aadan fariin helin 20 daqiiqo kadib, fadlan [soo gudbi codsiga caawimo](#).

Gahanna-Jefferson Public Schools

Parent Username

Password

[Log In](#)

[Forgot Password?](#) [Forgot Username?](#) [Help](#)

[Log in to Campus Student](#)

————— or ————

[New User?](#)

Cusboonaysiinta Macluumaadka Ardayga ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus


Sanadkasta waa inaad cusboonaysiisaa macluumaadka ilmahaaga ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus. Hadii aadan tan samaynin cunugaagu kama qayb qaadam doono munaasabadaha iskuulka qaarkood. Waa inaad cusboonaysiisaa macluumaadka sanad dugsiyed kasta.

Si aad u buuxiso cusboonaysiinta macluumaadka sannadlaha ah, ka gal boggaaga waalidka halkan:

https://gahannajeffersonoh.infinitecampus.org/campus/portal/gahanna_jefferson.jsp

Guji "More" (In ka badan) ee ku yaala tiirka gacanta bidix

Guji "Online Registration" (Diiwaangelinta khadka tooska ah) ee ku jirta xulashooyinka dhinaca midigta



Guji "Start" (Bilow) oo ku xigta "Existing Student Registration" (Diiwaangelinta Ardayga ee Jirta)

More Online Registration		
NAME	STATUS	ACTION
22-23 New Student Registration		<button>Start</button>
22-23 Existing Student Registration	NOT STARTED	<button>Start</button>

Cusboonaysii macluumaadka ka muuqda shaashada marka loo baahdo.

Ku bixinta kharashka Dugsiga Xiriirka Waalidka Infinite Campus

Fasalada qaarkood ama waxqabadyada iskuulka kadib waxay leeyihiin khidmad loogu talagaley in lagu bixiyo kharashaadka agabyo gaar ah ama qalabyo. Khidmahan si onlayn ah ayaa loogu bixiyaa Bogga Xiriirka Waalidiinta.

Si aad khidmaha u bixiso, guji "Fees" (Khidmada) oo ku taala dhinaca bidix.

The screenshot shows the Infinite Campus interface. On the left sidebar, under the 'Fees' section, there is a red arrow pointing to the 'Fees' link. The main content area is titled 'Message Center' and contains tabs for 'Announcements' and 'Inbox'. The 'Announcements' tab is selected, displaying the message 'No Announcements.'

Kadib, hel khidmadaha aad doonayso inaad bixiso oo ku jirta "Add to Cart" oo ah (ku dar Sallada).

The screenshot shows the 'Fees' page. On the left sidebar, 'Fees' is highlighted. The main content area displays a table of fees with two rows: 'JES - Field Trip' and 'JES - Instructional Fee'. Each row has an 'Add to Cart' button. A red arrow points to the 'Total Due: \$40.00' label at the top left of the fees table. Another red arrow points to the 'Add to Cart' button for the 'JES - Instructional Fee' row. On the right side, there is a sidebar with 'My Cart' and 'My Accounts' buttons.

Marka aad diyaar u tahay inaad bixiso, guji "My Cart." (Salladayda)

The screenshot shows the right sidebar of the Infinite Campus interface. It features two buttons: 'My Cart' with a shopping cart icon and 'My Accounts' with a wallet icon. A large red arrow points from the text above to the 'My Cart' button.

Ku dar ama dooro qaabka aad rabto inaad u bixiso, oo guji "Submit Payment." (Gudbi lacag bixinta)

Payment Method *

No payment methods available

Add Payment Method

Email Address for Receipt
schillingp@gjps.org

Subtotal: \$5.00

Service Fee:

Total: \$5.00

Submit Payment

Feedback

Payment Method

Accepted Payment Methods

Checking, Savings, or Card *

Checking
 Savings
 Credit Card/Debit Card

Nickname

Checking Account Number *

Routing Number *

First Name *

Last Name *

Address *

City *

State *

State

▼

Zip Code *

Save

Cancel


Kadib markaad gudbiso lacag bixinta, guji "Yes" (Haa) ee ku qoran sanduuqa xaqijinta.

Hadii ay lacag bixintu gudubto, waxaad shaashada ka arki doontaa "Payment Successful" oo ah (Lacagta waa lagu guulaystay). Boonada lacag qabashada iimaylka ayaa laguugu soo diri doonaa.


Lacag ku Shubida Kootada Qadada ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Si aad lacag ugu shubto kootada qadada ee ardayga adoo isticmaalaya Xiriirka Waalidiina.


Guji "Food Service." (Adeegyada Cuntada)



Guji "Pay." (Bixi)



Geli cadadka lacagta meesha ku xigta kootada ardayga oo guji "Add to Cart" (Ku dar Sallada).



Marka aad diyaar u tahay inaad bixiso, guji "My Cart." (Salladayda)



Ku dar ama dooro qaabka aad rabto inaad u bixiso, oo guji "Submit Payment." (Gudbi lacag bixinta)

Payment Method *

No payment methods available

Add Payment Method

Email Address for Receipt

scrappingj@jjps.org

Subtotal: \$5.00

Service Fee:

Total: \$5.00

My Accounts

Feedback

Submit Payment

Payment Method

Accepted Payment Methods



Checking, Savings, or Card *

- Checking
- Savings
- Credit Card/Debit Card

Nickname

Checking Account Number *

Routing Number *

First Name *

Fake

Last Name *

Parent

Address *

City *

State *

State

Zip Code *



Save

Cancel

Hadii aad doonayso inaad ku darto hab cusub oo lacag bixin ah, guji "Add Payment" (Ku dar lacag bixinta) oo buuxi macluumaaadka. Kadibna guji "Save." (Kaydi)

Kadibna dooro bixi lacagta sida kor ka muuqada oo guji "Submit Payment." (Gudbi lacag bixinta)


Kadib markaad gudbiso lacag bixinta, guji "Yes" (Haa) ee ku qoran sanduuqa xaqijintaa.

Hadii ay lacag bixintu gudubto, waxaad shaashada ka arki doontaa "Payment Successful" (Lacagta waa lagu guulaystay). Boonada lacag qabashada iimaylka ayaa laguugu soo diri doonaa.


Codsashada Qadada Bilaashka ah ama Qadada Qiima dhiman ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Gal kootadaada Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus.



Guji "More" (In ka badan) oo kadibna guji "Meal Benefits" (Faa'iidooyinka Cuntada).



Guji si aad u bilowda habka codsiga.




Guji "Yes" (Haa) si aad u abuurto lanbar sireedka (PIN) saxiixa elektarooniga ah.



Samee lanbar sireed ka kooban 5 xaraf ama lanbar ama xarfo gaar ah. Lanbar sreedku waa inay ku jiraan ugu yaraan hal xaraf iyo hal lanbar. Geli lanbar sreedka (PIN) aad dooratey labo jeer kadibna geli eray sreedka kootadaada Xiriirka Waalidka. Guji "Submit" (Gudbi).

Codsigu wuu furmi doonaa. Qaybaha codsigu kor ayay ka muuqdaan, marka aad dhamaysaba cagaar ayay isku bedeli doonaan. Raac tilmaamaha ku qoran qaybta sare ee bogga, kadibna guji "Next" (Xiga) si aad usii wado.

Waxaad haysataa 60 daqiico oo aad ku dhamaystiri karto qayb kasta. Hadii aadan qaybta buuxin kahor intaad wakhtigu dhamaan, codsigu wuu xirmayaa oo waa inaad markale bilowdo.



Sax sanduuqa qof kasta ee weli guriga ku nool.

Hadii ay jiraan dad liiska ka maqan, guji "Add Household Member" (Ku dar xubin qoyska ah) si aad iyaga ugu darto

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

Household Members are listed below. You must confirm each person living in your household by selecting the check box next to their name. If a person listed below is no longer living in your household, do not check the box next to their name. If there are persons missing from your household you will need to add them by selecting the 'Add Household Member' button. You are not allowed to edit existing household member information or uncheck the application signer. After you have identified and/or added household members select 'Next' to continue.

Name	Gender	DOB	School	Grade
<input checked="" type="checkbox"/> [REDACTED] (Signer)	F	[REDACTED]		
<input type="checkbox"/> [REDACTED]	M	[REDACTED]		
<input checked="" type="checkbox"/> [REDACTED]	M	[REDACTED]	Jefferson Elementary	04
<input checked="" type="checkbox"/> [REDACTED]	F	[REDACTED]	Jefferson Elementary	04
<input type="checkbox"/> [REDACTED]	F	[REDACTED]		

If you need to add additional household members click here. [Add Household Member](#)

Previous Next

Timeout: 51:50

Mararka qaar, su'aalo dheeraad ah ayaa soo bixi kara. Ka jawaab wixii lagu waydiyo.

Meal Benefits

Do any household members receive benefits? (SNAP, TANF, or FDPIR)

No Yes

Khaanada ciyaalka, sax sanduuqa cunug kasta ee ku nool guriga kuwaas oo ay da'doodu tahay 18 iyo wixii ka yar.

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

Child Members of the household must be confirmed by selecting the check box next to their name. Children are those members age 18 or under AND are supported with the household's income. After you have identified each child member, select 'Next'.

Name	Gender	DOB	School	Grade
<input type="checkbox"/> [REDACTED] (Signer)	F	[REDACTED]		
<input checked="" type="checkbox"/> [REDACTED]	M	[REDACTED]	Jefferson Elementary	04
<input type="checkbox"/> [REDACTED]	F	[REDACTED]		

Previous **Next** Timeout
56:56

Sax sanduuqa qof kasta ee aan shaqaynin ee guriga ku nool. Guji "Add Income" (Ku dar Dakhli) dadka dakhligu soo galoo.

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

If a Benefit or Student indicator is selected for any student, income information is not required. Providing your income information may help with the district verification process. For each Adult Household Member, report the total income for each source in whole dollars only. If they do not receive income from any source, write '0'. If you enter '0' or leave any fields blank, you are certifying that there is no income to report.

Name	Gender	DOB	No Income	Add Income	Student Indicator	Total Income
Adult Household Members						
[REDACTED] (Signer)	F	[REDACTED]	<input type="checkbox"/>	Add Income		
[REDACTED]	F	[REDACTED]	<input type="checkbox"/>	Add Income		
Child Household Members						
[REDACTED]	M	[REDACTED]	<input checked="" type="checkbox"/>	Add Income		

Previous **Next** Timeout
51:22

Geli cadadka nooc kasta oo ka mid ah dakhliga iyo inta jeer ee lacagtaas la qaato.

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

If a Benefit or Student indicator is selected for any student, income information is not required. Providing your income information may help with the district verification process. For each Adult Household Member, report the total income for each source in whole dollars only. If they do not fit report

Add Income

Income for [REDACTED]

Name	Income Type	Amount	Frequency
Adult Household	Earnings from Work	28,000	Weekly
Schilling, P.	Welfare, Child Support, Alimony		Every Two Weeks
Schilling, M.	Pensions, Retirement, Social Security, SSI, VA Benefits		Twice a Month
Child Household	All Other Income		Monthly
Schilling, C.			Yearly

Cancel Save Clear All

Previous Next

Timeout 57:24

Dhamaystir dhamaan qaybaha ku qoran khasnada ogolaanshaha adigoo gujinaya "yes" (haa) ama "no" (maya). Buuxi sanduuqyada kale oo guji "Accept" (Aqbal).

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

You must respond to [insert appropriate options here] and read the authorization statement below. By selecting 'Accept' you agree to the authorization statement and you will be taken to the Electronic Signature PIN entry screen to submit the application.

By selecting 'Decline' you do not agree to the authorization statement, the application will be cancelled and your information will no longer be available. If you choose to 'Decline' you may enter another application at any time.

Sharing Information with Other Programs

If your child is eligible for free or reduced priced meals, he or she may also qualify to receive other benefits. You must give your permission for us to share your child(ren)'s name and meal eligibility status with staff in charge of other school programs.

Filling out the Meal Benefits Application does not automatically qualify your child to receive other benefits.

Allow my child(ren)'s name and meal eligibility to be shared with staff in charge of Instructional Fees. Yes No
 Allow my child(ren)'s name and meal eligibility to be shared with staff in charge of Athletic Fees. Yes No
 Allow my child(ren)'s name and meal eligibility to be shared with staff in charge of Course Fees. Yes No

I do not wish to share my information with other programs.

Social Security Number

The income section of this application has been filled out. You are required to provide the last four digits of your SSN. Please enter the last four digits of your SSN or mark the "I do not have a SSN" box.

xxxx-xx- I do not have a SSN

Previous Decline Accept

Timeout 58:58

Geli lanbar sireedka saxiixaaga elektarooniga ah ee horay usoo samaysay oo guji "Submit" (Gudbi).

Meal Benefits Application

Letter to Household > Instructions > Signer Confirmation > Household Members > Children > Gross Income > Review > Authorization > Submitted

Apply E-Signature

Terms of Use

Gahanna-Jefferson Public Schools has adopted the use of electronic signatures for some documents. By registering and creating your electronic signature PIN you will be able to apply your signature electronically to some documents the district publishes that require your signature. Registration is easy to complete and takes less than 5 minutes.

Once registered, documents or applications that accept an E-signature may also give you the option to not use your electronic signature and instead print the document, sign, and submit the paper form. Not all documents or applications will require a PIN.

Please click Yes below to create your electronic signature PIN.

Enter your E-Signature PIN

[Submit](#) [Do not use E-Signature](#) [Forgot your PIN?](#)

Timeout
58:56